



U Fududeynta Suuro Galka Ah: Ma Dooneysaa In Kireystuhu Sameeyo Isbedel Waayo Waxa Aad Tahay Qof Naaf Ah

Reasonable Accommodations : Do You Need Your Landlord to Make a Change Because of Your Disability?

Ma codsan karaa isbedelo in loogu sameeyo gurigayga naafanimadayda awgeed?

Haddii aad tahay naaf oo kugu adag tahay in aad hesho guri ama aad heyso waxa aad kireeyaha weydiisan kartaa inuu ku sameeyo isbedel kuu fududeeya sidii aad halkaas ugu noolaan laheyd. Taas waxaa lagu magacaabaa “u fududeynta suurogalka.”

U Fududeynta Suuro Galka Ah.

Sharcigu waxa uu dhigayaa in kireeyuhu sameeyo isbedelka suurogalka ah, sharciyada iyo nidaamka u dagsan ayaa u ogolaanaya in dadka naafada ah guryahooda si raaxo leg ugu noolaadaan. Laakiin isbedelkaas waa inuu noqdaa “mid suurogal ah.”



Bedelitaanku waa wax macquul ah haddii:

- uu lagama maarmaan yahay,
- aysan uga bixin lacag ama khayraadyo kale mulkiilaha,
- uusan u geysan isbedel aasaasi ah nooca ganacsiga ee mulkiilaha.

Tusaale U Fududeynta Suurogalka ah #1

Maria waxa uu jegeeda SSI soo gaaraa 3da bil kasta. Iyadu gacanta kuma heyso marka uu jegeeda soo gaarayo. Maria waxa SSI loo siiyaa naafanimado darteed. Kireeyuhu waxa uu ka qaadaa lacagta la daahitaanka qof kasta oo lacagta kirada bixiya wixii ka dambeeya 1da bisha. Si ay Maria u hesho u fududeynta suurogalka ah waxa ay kireeyaha weydiisatay inuu u ogolaado bixinta kirtada ilaa 5ta bil kasta. Waxa kale oo ay ka codsatay in aan lacagta daahitaanka laga qaadin haddii ay kirada la dhaafin 5ta bisha. Kireeyuhu waa inuu ogolaadaa codsiga u fududeynta ee suurogalka ah.

Tusaale U Fududeynta Suurogalka ah #2

Betty dhawaanta ayaa waxaa laga helay cudurka isku buuqa. Ka hor intii aan xanuunka laga helin, shaqada ayey ka maqneyd dhawr jeer sababo la xiriiira xanuunkeeda. Shaqada oo aysan ku wanaagsaneyn darteed, Betty waa laga eryay shaqada, mana awoodin bixinta kirada. Hadda waxaa diiwaanka ugu jira in guriga laga saaray.

Betty waxa ay raadineysaa hoy cusub. Waxa ay codsatay guri uu sharciga aanu goleyin in laga kireeyo qof horey guri looga saaray. Betty waxa ay weydiisan kartaa “u fududeynta suurogal ah.”

Waxa ay kireeyaha weydiisan kartaa in sharciga wax looga bedelo maadaama guriga laga saaray ay u sabab aheyd xanuunka dhimirka ee ku dhacay.

Laakiin Betty waa inay siiso mulkiilaha guriga wuxuun hubaal ah oo ah inay u hogaansamayso heshiiska (lease) ayna bixin doonto kiradeeda mustaqbalka. Kuwaasi waxa ay noqon karaan waxyaabaha sidda cadeyn ah in ay ku xakamayn doonto cudurkeeda dhimirka daawo. Ama warqad uu soo qoray qofka madaxda u ah iyadda oo sheegaysa inay tahay qof la isku halayn karo aysana wax badan shaqada ka maqnaan. Waxay kaloo ku baaqi kartaa inay dhigto lacag dabaaji ah oo dheeri ah.

Sidee Ayaan Ku Ogaan Karaa In Aan Weydiisan Karo U Fududeynta Suurogalka Ah?

Ka jawaab su'aalaha soo socda:

	HAA	MAYA
Wax dhib ah miyaad ku qabtaa in aad hesho ama ku nagaato guri taasoo ay ugu wacan tahay naafanimo .		
Isbedelka aad weydiisaneyso ma kuu siinayaa fursad in aad guri hesho ama kaa caawinayaa in aad ku nagaato?		
Ma u hogaansameysaa heshiiska kirada haddii isbedelka lagu sameeyo?		
Isbedelka ka dib, ma hubtaa in dhaqankaagu uusan khatar ku aheyn hantida iyo nabadgelyada dadka kale ee dhismaha ku nool?		

Haddii aad ku jawaabtay HAA dhamaan 4ta su'aalood ee kor ku xusan waad weydiisan kartaa u fududeyn macquul ah.

Sidee Ayaan Ku Weydiisan Karaa U Fududeynta Suurogalka Ah?

Haddii aad dooneyso in aad weydiisato u fududeynta suurogalka ah, haddii ay suurogal tahay waa in aad:

1. Codsigaaga qoraal ahaan ku soo gudbi oo nuqul (koobi) ka reebo.
2. Ku lifaaq wixii qoraal ah ama warqado ah oo tixraac ah oo aad ku cadeynta karto oo taageeraya codsigaaga.

Marka aad weydiisato u fududeynta suurogalka ah, kireeyaha ayey ku xiran tahay inuu ogolaado ama cadeeyo sababta aysan xiriir ula laheyn naafanimo.



Xusuusnoow, ma jirto jawaab sax ah ama khalad ah su'aasha ku saabsan u fududeynta suurogalka ah. Ka fikir waxyaabaha aad weydiisan karto oo kireeyuhu ogolaan karo si aad guri u hesho ama u heysato. Waxaa lagaa doonayo in aad hal abuur la timaado.

Maxaan yeelayaa haddii aanu mulkiiluhu ii ogoleyn u fududeynta suurogalka ah?

Haddii aad ku jawaabtay HAA 4ta su'aalood ee kore oo aad soo gudbisay codsiga u fududeynta suuro galka ah LAAKIIN uu diido kireystahaaga inuu isbedel sameeyo, waxaa loo qaadan karaa in heyb sooc lagugu sameeyey.

Dakhligoodu yahay, dadka da'da iyo naafada ah ee Minnesota, ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529.

Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Waxa kale oo aad caawinaad weydiisan kartaa hay'adaha dawladda ee looga dacwodo sharciyada heyb sooca guryaha. Lacag la'aan ayey baaritaanka ku sameynayaan.

MN Department of Human Rights

(Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota)

Griggs Midway Building
540 Fairview Ave North, Suite 201
St. Paul, Minnesota 55104

Telefoonka: (651) 539-1100 or 1(800) 657 3704
MN Relay (*dadka maqalku ku adag yahay*): 711 ama 1(800) 627-3529

Khadka Gargaarka Heybsooca: 1 (833) 454-0148
limeylka ee: info.mdhr@state.mn.us www.mn.gov/mdhr/

Housing and Urban Development (HUD)

Minneapolis Field Office
212 Third Ave South, Suite 150
Minneapolis MN 55401
Telefoonka: (612) 370-3000

Housing and Urban Development (HUD):

(Waaxda Guryaha iyo Horumarinta Magaalooyinka)
77 West Jackson Boulevard, Suite 2600
Chicago, IL 60604-3507
Telefoonka: (800) 669-9777



Labada xafiisba: www.hud.gov

Wax kasta oo aad sameeyso, dhaqso ugu dhaqaaq. Xaaladaha qaarkood, waxa aad u baahan tahay in aad cabasho ama dacwadaada soo gudbisno 1 ama mararka qaarkood 2 sano gudahood.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.